



MIDOWGA DALLADAHA WAXBARASHADA SOOMAALIYEED Somali Education Umbrellas

WARSAXAAFADEED

Anagoo tixtaaceyna shir jaraa'id maalintii shalay oo ku beegneyd 05, June 2022 lagu qabtay magaalada muqdishu oo lagu sheegay in lagu qaadacay imtixaanka shahaadiga ee Wasaaradda, iyadoo Magaca Midowga Dalladaha Waxbarashada loo isticmaalayay qaadacaada Imtixaanka ayaa maanta oo taariikhda tahay 06, June 2022, waxaa shir deg deg ah isugu yimaaday gudiga sare ee midowga dalladaha waxbarashada, waxayna wadahal si qoto dheer loogu lafaguray xaaladaha waxbarashada dalka gaar ahaan gobolka Banaadir kadib ayaa waxaa laga soo saaray qodobada soo socda:

1. Midowga Dalladaha Waxbarashada Soomaaliyeed Qayb kama ahayn kamana ahan qaadida Imtixaanka Shahaadiga ah ee Wasaaradda, Waxayna Midowga Dalladaha ka digayaan Jahwareer Waxbarasho ay abuurayaan dad la jaanqaadi la' horumarka iyo kor u kaca tayada waxbarashada guud ahaan.
2. Wasaaradda Waxbarashada waa Hay'adda iyo Hogaanka waxbarashada ee ugu sareysa Dalka, sidaa darteed waa in looga dambeeyaa nidaamka iyo siyaasadda Waxbarashada guud ahaan. Wixii talo, farsamo iyo soojeedinna loo maro nidaamka sharci ah.
3. Midowga Dalladaha Waxbarashada waxay ugu baaqayaan dhamaan Waalidiinta, Ardeyda iyo Maamulayaasha dugsiyada in ay u diyaar garobaan kana qaybgalaan Imtixaanka shahaadiga ee Wasaaradda islamarkaana ku garab istaagaan wasaaradda Waxbarashada Shaqada adag ay u hayaan Ubadka Soomaaliyeed. Kana feejignaadaan wararka been abuurka oo mugdi lagu galinaayo aayaha ubadka Soomaaliyeed.
4. Ugu Dambeyn, Midowga Dalladaha waxbarashada waxay markasta diyaar u yihiin inay si hufan ula shaqeeyaayaan Wasaaradda Waxbarashada, iyo Agaasinka Waxbarashada Gobolka Banaadir.

Fiiro Gaar ah

Waxbarashada Gaarka ah waxaa mas'uul ka ah Midowga Dalladaha waxbarashada Soomaaliyeed.

DHAMAAD



TARABUUNKA ROAD, NEAR TO EX-BANAADIR HIGH SCHOOL, HODAN DISTRICT, MOGADISHU- SOMALIA

Contact: 0615568784

Email: educationumbrellas@edusomalia.com